# Maxaa dhacaya haddii aanan bixin cashuurta Guriga (Hanti ma guurtada ah)

## Hanti/Guri ku waayid cashuur bixin la'aan

What happens if I don't pay my property taxes? - Property Tax Forfeiture

### Taxadar la imow (feejignow)!

Haddii aad dib ula dhacdid bixinta cashuurta guriga, waxaad waayi kartaa guriga iyo raasumaalka kaaga jira guriga! Tan waxaa loo yaqaan Guri ku waayid Cashuur bixin la'aan. taxadar gaar ah sii dhamaan ogaysiinta lagu siiyo ee ka yimaada magaaladaada, xaafadaada, ama degmadaada ee ku taal gobolka Minnesota. Waxaa ku jira waqti adag ee la xadiday!



Kolka qofku uusan bixin canshuurta guriga muddo, gurigiisa kolkaa waxaa la wareegi dowladda. Laakiin habraaca aad ku waayayso waxaa maamula degmada ee gurigu ku yaal. Waaxda degmada u qaabilsan cashuuraha guryaha ayaa ah meesha ugu weyn ee aad la xiriirayso kana helaysid macluumaad.

### "La Daahidda" vs 'Dib U Dhac" Cashuurta Guriga

Hadii aadan bixin cashuurta guriga bilaha Maajo iyo Ocktoobar, waxaa loo yaqaan la daahid waxaana lagu darayaa kharjka la daahidda bil kasta.

Haddi aadan bixin cashuurta guriga ee sannadka oo dhan, Gobolka Minnesota wuxuu u yaqaan cashuurtaa " Dib u Dhac weyn" maalinta ugu horeysa ee sannadka ku xiga.

Tusaale:

- Barka hore ee sannadka 2020 bixinta cashuurtu waxay soo gelaysaa bisha Maajo 15, 2020. Waxaad ku bixin kartaa waqtigeeda.
- Barka dambe wuxuu soo gelayaa Oktoobar 15, 2020. Weli ma bixin. Hadda barka labaad ee 2020 waa cashuurta gurigu waa "daahday". Ciqaab la daahid ayaa lagu darayaa kharajka bisha Oktoobar 16, ciqaabtuna waxay kordhaysaa bil walba haddii aadan bixin.
- Waxaad haysataa ilaa Diseembar 31, 2020, in aad ku bixiso barka labaad ee cashuurta guriga oo ay ku jirto kharajkii la daahidda.
- Maalinta shaqo ee ugu horeysa 2021, haddii aadan weli bixin wax cashuur ah ee lagugu lahaa, cashuurta gurigaaagu waxay noqotay "Dib u Dhac weyn".

## Waxaa igu yimid dib u dhac weyn. Maxaa ku xiga ee dhici kara?

Mar haddii uu kugu yimaado " Dib u Dhac Weyn" ee bixinta cashuurta gurigaaga, waxaa bilaabanaya hab raaca " Guri ku waayid Cashuur bixin la'aan". Waxaad haysataa waqti aad ku xaliso waxa jira, laakiin haddi aadan bilaabin, waxaad ku dambaynaysaa in gobolku gurigaaga geliyo " Guri ku Waayid Cashuur la'aan". Haddii habraacaas uu dhamaado, guriga waxaa lagu iibin karaa xaraash waana lagaa qaadi.

Marka hore, waxaad helaysaa **Ogaysiin Dib u Dhac Weyn** iyo **warqad Dib u Dhac cashuurta** guriga, bisha Maarso 20 ee sannadka loo aqoonsaday in uu dhacay " Dib u Dhac Weyn" . haddii ay jiraan qayba kale ee daneynaya, sida qof ama shirkad guriga ku leh amaah, iyaguna wey helayaan ogaysiinta. Ogaysiinta iyo warqaddu waxay ku kala yaalaan labada dhinac ee isla hal warqad. Ogaysiintu waxay sheegaysaa waqtiga uu dhacay la wareegidda guriga iyo hab raaca waqtiyada ugu muhiimsan. Warqaddu waxay kuu sheegaysaa in aad si taxadar leh u akhriso, waxay kaloo cadaynaysaa inta lagu leeyahay, waxay xisaabinaysaa dulsaarka, iyo timaan bixinta sida loo bixinayo.

Haddii aadan ku raacsanayn sida cashuurta loo xisaabiyay ama loo qiyaasay ogaysiinta dhexdeeda, waxaad qorran kartaa **diidmo** waqtiga kama dambaysta ah ee ku qoran ogaysiinta. Ogaysiintu waxay kuu sheegaysaa sidii aad u dacwoon lahayd, FEEJIGNOW! Ogaysiinta degmooyinka qaarkood waxaa qora kombiyuutar 40 sanno jira, ayna adag tahay in la akhriyo. Akhri wax walba si taxadar leh oo wac xafiiska degmada waaxda u qaabilsan cashuuraha guryaha isla markiiba weydii hadii aad su'aal ka qabtid.



Haddii aadan waxba diidanayn, ama ay maxkamadi si lid ku ah xukuntay diidmadaada, maxkamadu waxay gelinaysaa **Xukun Makamadeed ee canshuurta.** Taas micneheedu waxa weeye guriga wax baa lagu leeyahay oo ah tirada cashuurta Dib u dhac ku timid.

Marka xukunka la geliyo, gurigu wuxuu gelayaa **naadin qiimo lagu** t**artamo** Isniinta labaad ee bisha Maajo. Taas micneheedu waxa weeye gurigu weli addiga ay ku qoran yahay, laakiin gobolka ayaa wax ku leh wixii ka soo baxa. Tani waa bilowga xiliga dib u helida. Cidda yeelan doonta guriga waxay ku xirrantahay xilliga dib helidda.

## Xilliga Dib u helidda

**Xilliga dib u helidda** wuxuu dhamaanayaa 3 sanno ka dib marka gobolku naadiyo qiimaha lagu tartamayo. Inta xilligan lagu jiro, adiga ama cid kasta oo si sharci ah wax ugu sheeganaysa, waxay xaq u leeyihiin **dib u helidda**, ama **dib way u heli karaan**. Si aad dib ugu heshid waa in aad bixisaa cashuurtii dib u dhacday, oo ay ku jirto kharashka iyo dulsaarka.

Haddii aad bixiso wixii lagu lahaa, xukunkii lidiga kugu ahaa waa la tirtirayaa, guriguna ma ahaanayo wax Dib U Dhac Weyn ee cashuur ah ku yimid. Wixii gobolku ka rabay iyo cashuurtiiba waa laga masaxayaa.

Haddii ay da'daadu tahay 65 sano, waxaad ka soo bixi kartaa shuruudaha barnaamijka dadka waaweyn guryahooda cashuurta laga daayo. Tani waxay kaa caawimi kartaa in aad daaweyso

Dib u la dhadaca canshuurta, oo aad awoodi kartid oo cashuurtii gurigaaga ay hore u socoto. Macluumaad dheeraad ah tag www.revenue.state.mn.us/property-tax-deferral-senior-citizens ama la xiriir xafiiska cashuuraha degmadaada. Waxaa kaloo jira barnaamijyo ciidamada da'da ah iyo dadka naafada ah.

Hadii qolo sedexaad oo shaqo ku leh hawsha guriga, sida shirkad amaah guri, ay bixiso canshuurta guriga lagu leeyahay oo wada gudo, cadadka guud ee la bixiyey waxaa lagu daraa qolada wax bixinaysa qaantooda jirta. Lacagta dulsaarta ahi waxa ay ugu kordhi qaanta jirta sida uu qabo heshiiska qaanta ee jira. KA TAXADAR in haddii shirkadad amaahda gurigu ay bixiso canshuurta aadana dib ugu gudin lacagta canshuurta, waxay u badan tahay kolkaa inay bilaabaan la wareegid guriga ah. Waxa ay ku xiran waxa uu ogol yahay heshiiska amaahda gurigu. Arrintani khaasatan waa xaqiiq hadii aad qabto waxa la yiraa amaahda guriga ee gadaal u noqodka.

Xilliga Guri la Soo Noqoshada lagu jiro, waxaa aad la geli kartaa "**Qirasho ah in Xaq lagugu Leeyahay ah degmadda.**" Qirashada Xaqqa lagugu Leeyahay waa sida qorshe dib u bixin lacag oo kale oo kuu ogolaada inaad bixiso xaqqa lagu yeelay muddo cayiman gudaheed intii aad hal mar wada bixin lahayd. Caadiyan, dadka guryaha degaanka ah waxa ay la siin karaa qorshe 10-sanno lacagta lagu bixinayso, laakiin, waa inaad taa ka hubisaa degmadaadda.

## Sidee Qirasho Xukun u shaqeeyaa?

- Waxaad geleysaa heshiis aad ku bixinayso cashuurtii lagugu lahaa ee aad dib ula dhacday iyo kharajkii yo dulsaarka in aad si is le'eg ku bixinaysid sannadkiiba. Inta badan waxaad ku bixinaysaa 10 sano. Waa in aad sidoo kale bixisaa cashuurta sannadka socda.

- Waa in aad bixisaa xisaabtii ugu horaysay isla markiiba si ay kuugu bilaabato qirashada xukunka. Taas waxaa loo qaadanayaa hor u marin .




**Qorshe 10 sano,** horumarintu waa 10% intii cahuurta dib u dhacday, oo ay ku jirto kharajka iyo dulsarka.

- Bixinta ku xigta waxay soo gelaysaa marka hal sano ka soo wareegto markii aad qirashada xukunka gashay. Haddii aadan ku bixin taariikhdaas, degmadu waxay ku saari kartaa kharash dib u dhac. **Waa in aad bixisaa ka hor 31 Diseembar ee sannadka.** Bixin kasta ee ka dambaysa waa in ay dhacdaa 31 Diseembar sannad walba.

- Haddii aad gafto bixinta lacagta ama aad u ogolaato in canshuurta sannadka markaa lagu jiraa ay noqoto mid dib loola dhacay bixinteeda, kolkaa heshiiska Qirashada Xaqqa lagugu Leeyahay waa la joojin. Xukunka lagugu xukumay canshuurta lagugu leeyahay dib ayaa loo soo noolaysiin waxaadna dib ugu noqon hawshii guri la wareegida ahayd.

- Haddii Qirashada Xukunk looga bixin la'aan, waxaad geli kartaa mid kale, Laakiin waxaad samayn kartaa 2 Qirasho keliya.

## Maxaa dhici kara haddii aanan samayn Qirasho Xukun si aan u helo qorshe aan wax ku bixiyo ?

Hadii aadan dib u helid samayn ama aadan ku guulaysan in aad gasho Qirasho Xukun oo leh qorshe wax bixin, Xilliga Dib u Helida wuxuu dhamaadaa 3 sano, ka dib marka uu gobolku naadiyo qiimaha guriga lagu iibinayo. Adiga iyo cidda kale ee xiisaynaysa waxay helayaan hal ogaysiin, oo boostada loogu keenay guriga si uu u saxiixo: “ **Ogaysiin Dhicitaanka Dib U Hellidda**. Dadka guryaha leh badidood way helaan ogaysiintaan, bisha Janaayo ee sanadka uu dhamaanayo xilliga Dib u Hellida.

Tusaale:

- Hadii aadan bixin cashuurtii guriga ee 2020.

- Cashuurtu waxay noqonaysaa “ Dib U Dhac Weyn”, xukun ayaa la diiwwan gelinayaa, gurigiina gobolka ayaa naado gadid la geliyay sanadkii 2021. Tani waa marka ay bilaabanayso 3-sano ee “Xilliga Dib u Hellida”.

- Hadii aadan Dib u Hellid samayn, ama aadan haysan Qirasho Xukun ee aan weli dhicin, waxaad helaysaa ogaysiinta Dhicitaanka Dib u Hellida bisha Janaayo 2024. Ogaysiintaani waxay kaaga digaysaa in xilliga Dib u hellida 3da sanno ee ay ku egtahay guriga 2024.

Waxaad kaloo gadi kartaa gurigaaga ka hor xilliga dib u helidda. Waa in aad degmada siisaa cashuurtii guriga ee dib u dhacday, waxa ka soo baxa gadida guriga, laakiin waxaad la hari kartaa wixii raasumaal ah ee kaaga hara. Gaddida guriga si aad u badbaadiso raasumaalka waxay in badan ka wanaagsan tahay in guriga loo gacan geliyo gobolka.




## La Wareegid

Ogaysiinta dib u helidda waxay kaloo kuu sheegaysaa in guriga ay degmadu la wareegayso 60 maalmood ee ugu horeeya ka dib marka laguu soo diro Ogaysiinta, ama Isniinta ugu horeysa ee bisha Maajo, hadba kii dambeeya.

Tariikhda saxda ah ee la wareegidda guriga waxay ku xirantahay degma kasta jadwalkeeda. Waa in aad macluumaad dheeri ah kala xiriirtaa waaxda degmada u qaabilsan cashuuraha.

Kolka la wareegida gurigu ay jaa dhacdo, dowladdu waa inay qabato xaraash cid walba u furan oo guriga lagu xaraashayo. Waa inay ku daabacaan ogaysiis ku saabsan xaraashka wargeysyadda, shabakadaha, iyo meelaha kale ee u adeega bulshada ee deegaanka gurigu uu ku yaal.

## Siddee ayuu u shaqeeyaa xaraashka cid walba u furani?

Dowladda waa inay dajiso qiyaasta qiimaha suuqa ee guriga. Waxa ay isku dayi marka hore inay ku gadaan cadadkaa 30 cisho. Ka dib markaa, dowladdu waxa ay goysaa cadadka 'ugu yar ee yaboohida." Cadadkani waa cadadka guud ee canshuurta lagu leeyahay guriga, ganaaxa, dulsaarka, iyo kharashaadka lagugu leeyahay oo la isku wada daray. Hadii aan cidna ku yaboohin cadadka ugu yar ee lagu yaboohi karo, kolkaa gurigu waxa uu aadi dowladda. Xaraashka waxa uu ka dhici karaa khadka (online) ka. Cidii guriga gadataa waxa ay lacagta siin dowladda.

## Ka waran haddii guriga lagu gado lacag ka badan waxa la igu leeyahay?

Marmarka qaarkood guriga waxaa lagu xaraashaa lacag ka badan cadadka ugu yar ee yaboohida ee waxa lagu leeyahay. Faraqa u dhaxeeeya qiimaha gadida iyo cadadka ugu yar ee yaboohida waxaa la yiraa "dheeraad." Adiga iyo dadka kale ee qaanta sharciga ku leh guriga waxa aad xaq u leedihiin inaad xareysataan qaan ah lacagtan dheeraadka ah ka dib kolka guriga la gado.

## Ciddee kale ayaa qaan sheegan karta oo aan aniga ka ahayn?

Cid walba oo qaan sharciga ku leh gurigaaga ayaa waxa ay u sheegan kartaa qaan lacagta dheeraadka ah. Tusaale arrintan ahi waa haddii ruux uu gurigaaga qaan ugu leeyahay lacag uu adiga ku leeyahay awgeed.



## Siddee ayey qaantani u shaqeysaa?

60-cisho gudahood ka dib gadidda guriga, dowladdu waa in ay kuu soo dirto ogaysiis ku saabsan lacagta dheeraadka ah iyo foom la buuxinayo. Waxay kaloo tan u diraan cid walba oo kale oo qaan sharci ah ku leh guriga. Haddii aadan ku xareynsan qaan sheegadkaaga 90-cisho gudahood, waa inay kuu soo diraan ogaysiis labaad inta u dhaxeysa 90 iyo 120 cisho gadida ka dib. Waa inaad ku soo dirtaa foomka 6 bilood gudahood laga bilaabo maalinta ogaysiiska. Haddii ay jiraan in ka badan hal qaan sheegad, dowladda ayaa go'aamisa inta ay tahay lacagta uu qof walbaa helayaa siisana lacagtaa. Haddii uu jiro khilaaf arrintan ku saabsan, kolkaa dowladda waxa ay arrinta u gudbisaa maxkamad. Maxkamadda ayaa go'aamisa inta ay tahay lacagta qof walba la siiyo.

## Ka waran haddii dhulka guriga ay ku jirto macdani?

Waxaa jira xeerar gaar ah haddii dhulka gurigu uu leeyahay macdan sidda, Iroon, gaas, ama dhuxul. Dhulalka caynkaas ahi ma laha xaraash cid walba u furan. Dowladdu ayaa toos ugu qaadata dhulkaas $50. Haddii qiimaha macdantu uu ka yar yahay cadadka yaboohida ee ugu yar ee lagugu leeyahay, wax aad helaysaa ma jiraan. Haddii qiimaha macdantu uu ka badan yahay cadadka ugu yar ee yaboohida ee lagu leeyahay, adiga iyo dadka kaleba waxa aad xareysan kartaan qaan sheegad ku salaysan faraqa u dhaxeeya qiimaha qaanta iyo cadadka ugu yar ee yaboohida.

## Ma jiraan wax aan samayn karo si aan guriga u sii lahaado ka dib marka lala wareegay?

Mar haddii guriga lala wareego, waxaa kuu furan 2 siyood oo aad guriga dib ugu yeelan karto oo aad ku badbaadin karto wixii raasumaal ah ee guriga kaaga jira:

(1) Ka gadasho guriga rugta lagu xaraashayo, ama
(2) U qoro codsi degmada in aad dib u soo gadato guriga.

**Ka iibsiga rugta xaraasha:** qof kasta qiimo waa ku beecin karaa guri loo xaraashayo la wareegid cashuur bixin la'aan, aan ka hayn shaqaalah iyo saraakiil gaar ah ee degmada ka socda. Qiimo waad ku beecin kartaa guriga, laakiin kuma gadan kartid wax ka yar cashuurtii dib u dhacday, ganaaxii, dulsaarkii iyo kharashyadii kale qiime ka yar.




**Arjiga dib u iibsashada:** Waqti walba oo ka horeeya ka hor inta aad dowladdu gadin ama aysan ka takhahlusin guriga, waxa aad xaq u leedahay inaad dib u gadato guriga (mar kale gaadato) adigoo siinaya dowladda wax walba oo lagugu leeyahay. Cadadkan waxaa ku jira qiimeynaha, canshuurta, ganaaxa, kharashaadka, iyo dhulsaarka.

**Fiiro Gaar Ah:** Marka guriga la xaraasho, ma codsan karto in aad dib u gadatid.

## Maxaa dhacaya haddi aan guriga iska joogo?

Hadii aad guriga iska joogtid, degmadu waxay kuula imanaysaa ogaysiin in guriga lagaa saaro. Tan waa talaabadii ugu dambaysay. Degmooyinku waxa ay jeceyl yihiin inay kaala shaqeeyaan adiga inaad hesho jid aad uga baxdo guriga adigoon lagugu xukumin wax guri ka saarid. In guri lagaa ijaaro way adagtahay adigoo Khasab guri lagaaga soo saaray. Waxaa wanaagsan in aad degmada la shaqayso in aan sidaasi dhicin.

## Haddii gurigayga la igala wareego oo aan ka guuro – maxaan hadda sameyn karaa?

Waxaa jiray kiis weyn oo maxkamadeed oo dad badan oo guriyahoodii loogala wareegay canshuur bixin la'aan ay ku bahoobeen. Maxkamadda Sare ee wadanka ayaa tiri dadka guriyahooda loogala wareegay canshuur bixin la'aan awgeed waa in la siiyo wixii lacag ah ee soo harta ee ah faraqa u dhaxeeya qiimaha gadida kolka guriga la gado iyo wixii canshuur ahaa ee guriga lagu lahaa. Haddii aad ku nooshahay degamadda Hennepin, waa inaad hesho lacagtaam, haddii gurigaaga lagaala wareegay lana gaday mudaddii u dhaxaysay Ogoosto 2012 iyo Deseemabr 2023. Hadii aad ku nooshahay gobolka intiisa kale, Waxaa aad heli kartaa lacag haddii gurigaaga lagaala wareegay lana gaday, mudaddii u dhaxeysay 2016 iyo 2023, Gal barta mntaxforfeituresettlement.com si aad aragto inaad qaansheegan kartid iyo in kale.

## Haddii aad guriga dhaxal u heshay

Dadka bixinta cashuurta guryaha dib u dhiga illaa lala wareego inta badan way dhaxleen guriga. Mararka qaarkood cidda ku qorran guriga waxay dhib u ku keentaa in guriga dib u soo gataan. Hadii guriga aad dhaxal u heshay laakiin hantida qofka guriga lahaa ee geeriyooday aan marna maxkamadda dhaxalku gelin, guriguna uusan magacaaga ku qornayn, waxaa dhici karta kolkaa inaad u baahato in dhaxalka maxkamadda dhaxalku gasho si aad u hesho in guriga adigu laguugu qoro. Degmadu waa kaala shaqaynaysa in aad dib uga dartid guriga, inta aad sugayso dacwada dhamaystirka arrimaha guriga la dhaxlay. Kala hadal arrintaa xafiiska degmada u qaabilsan cashuuraha sida ugu dhaqsa badan.

## Ka digtoonow khiyaamo!

Dib ula dhicid bixinta cashuurta, iyo jadwalka la wareegidda guryaha waa macluumaad dadweynuhu ogaadaan! Kuwa khayaamada saMaajoa way heli karaan macluumaadkan waana kula soo xiriiri karaan iyagoo kuu sheegaya in ay ku caawimaan. Waxaa laga yaabaa in ay yiraahdaan waxaan kaa bixinaynaa cashuurta haddii aad saxiixdo in ay guriga wax ku sheeganayaan, ama in guriga magacooda lagu qoro. Tani waxay siinaysaa in ay go'aanka guriga wax ku yeeshaan ama ay lacag ka helaan. Tan waxaa loo yaqaan “ Hanti boob”. Waxba ha saxiixin illaa aad marka hore la hadasho gar yaqaan!

## Xagee ayaan gargaar ka heli karaa?

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, wac ama u soo arag waaxda cashuuraha ee degmada. Inta badan degmadu ma rabto in ay qaadato gurigaaga, laakiin waxay raacaysaa sharciga gobolka. Degmadu waxy ku siinaysaa macluumaadka aad u baahan tahay io dhan.



Degmooyink waaweyn waxay leeyihiin kayd xog iyo shaqaale caawima dadka guryaha leh, iyo kuwii hore u lahaaba si ay wax uga ogaadaan Qirashada Xukunka ama hab raaca dib u gadashada.

Waxaad kaloo ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529.

Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Waaxda Maaliyadda Minnesota waxaa laga heli karaa macluumaad ku saabsan cashuurta guryaha iyo la wareegidda fiir halkaan www.revenue.state.mn.us/delinquent-real-property-tax-and-tax-forfeiture-manual, oo ay ku jirto “ Diiwaanka cashuurta Dib u dhac ku yimid, iyo cashuurta la wareegidda” ama “Buugga Cas.” Kan waa kayd xog dhamaystiran oo sharaxaysa hab raac la wareegidda guriga.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**